



Jadwalka Cusub ee Goobaha Laga Qaybinayo Kumbuutarada

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Waxa aanu dib u bilaabi doonaa qaybintii kumbuyuutarda maalinta Isniinta ee bisha Abriil tahay 13ka. Shaqaalaha PPS waxa ay ku mashquulsanaayeen labadii maalmood ee u dambeeyey sidii ay u soo ururin lahaayeen, nafiidin lahaayeen iyo sidii ay ugu xirxiri lahaayeen kumbuyuutaro badan ardaydeena. Dadaaladani waa sii socon doonaan inta lagu gudo jiro todobaadka soo socda oo dhan, iyada oo aan rajeyneyno in aan u heli doono kumbuyuutaro ku filan arday kasta oo aan hadda guriga ku haysan kumbuyuutar.

Habka goobaha aan todobaadka soo socda uga qeybineyno aad baan u habeynay. Si aan u hubino in ay si degdeg ah oo wanaagsan ay kumbuyuutaradu u gaaraan, **waxaan qoysaska ka codsaneynaa wali u baahan kumbuyuutar** in [waxbarashada online](#) ku qaataan in ay raacaan jadwalka cusub ee soo socda:

- Qoysaska uu magaca awoowahood ka bilaabmo xarafaha A-M waxa ay iman karayaan maalinta Isniinta ee bisha Abriil tahay 13ka sidii ay ardaygooda ugu qaadi lahaayeen kumbuyuutar.
- Qoysaska uu magaca awoowahood ka bilaabmo xarafaha N-Z waxa ay iman karaan maalinta Tallaadada ah ee bisha Abriil tahay 14ka sidii ay ay ardaygooda ugu qaadi lahaayeen kumbuyuutar.
- Dhammaan qoysaska iyada oo aan loo eegin meesha uu ka bilaabmo magaca awoowahood waxa ay iman karaan maalmaha Arbada ilaa Jimcaha sidii ay ardaygooda ugu daysan lahaayeen kumbuyuutar.

Goobaha lagu qeybinayaan waxa ay furmi doonaan saacadu marka ay tahay 9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo:

- Xafiiska Xarunta Dhexe ee Portland - 501 N Dixon St
- Dugsiga Sarre ee Roosevelt - 6941 N Central St
- Dugsiga Sarre ee Franklin - 5405 SE Woodward St
- Dugsiga Sarre ee Jefferson - 5210 N Kerby Ave

Si aad ugu daynsataan kumbuyuutar ardaydiina waa in aad soo qaadataan aqoonsiga ardayga (ID) ama lambarka aqoonsiga ardaygiina.

Ilaa maanta, waxa aan awood u yeelanay inaan 6,000 kumbuyuutar daymino ardayda. Waxa aanu mudnaanta koowaad siineynaa caafimaadka iyo nabadgelyada shaqaalahayaga, ardaydayada iyo bulshadayada, sidaas darteed Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay raacayaan tallooyinkii xafiiska CDC ee ku saabsanaa in dadku masaafada isku jiraan oo ayna isku soo dhawaan marka ay joogaan goobaha laga qaadanayo kumbuyuutarada. **Sababata aan idiinka codsaneynaa waxa weeye qof kasta waxaa ku jirta caafimaadkiisa iyo nabadgelyadiisa:**

- Haddii aad baabuur wadato: Fadlan baabuurkaaga ku jir marka aad soo gaadho goobta. Kooxdyada ayaa kuugu iman doona gaarigiina si ay kumbuyutarka kuugu keenaan.
- Haddii aad lugeyneso ama aad soo raacday baabuurta la wadaago ama gaadiidka dadweynaha: Fadlan waxaad xushmeysaa xeerka lixda tallaabo la isku jirsanayo. Waxa aanu lahaan doonaa layn marka la qaybinayo kumbuyutara.
- Fadlan waxaad soo dabooshaa afka iyo sinka sida ay dhigayaan [Tallooyinka hadda ee CDC](#).

Waxa aan idiinka mahadcelineynaa sabirkiina iyo sida aad u fahamsan tiihiin xaalada, iyada aan idii qeybin doono todobaadka soo socdo kumbuyutaro kale.